**Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota**

**Habraaca Codsiga Xogta ee loogu talagalay Xubnaha Dadwaynaha**

Xeerarka Minnesota ee §13.025 iyo §13.03 ayaa u baahan dukumentigan.

**Xaqa Marin u Helitaanka Xogta Dadwaynaha u Furan**

Xeerka Hab-dhaqanka Xogta ee Dawladda Minnesota (Xeer. Minn. §13) ayaa u qaadanaya inay dhammaan macluumaadka dawladdu yihiin xog dawladeed haddii kale oo sharciga gobolku ama ka federaalku ama u qoondayn ku meelgaarka ahi ay tilmaamayso inay xogtu aany ahayn mid dadwaynaha u furan mooye. Xogta dawladdu waa kelmad macnaheedu yahay dhammaan macluumaadka la diiwangaliyay ee qayb dawladeed ay sameysay, ururisay, keydisay, ama ay u hayso sidii ay u fulin lahayd shaqadeeda.

Xeerka Hab-dhaqanka Macluumaadka Xogta ee Dawladda Minnesota ayaa u baahan inay hay'adaha dawladdu ay ugu hayaan macluumaadka dawladda hab fududeynaya marin u helidda. Waxaad xaq u leedahay inaad eegto (fiiriso), lacag la'aan ahaan, dhammaan macluumaadka dadwaynaha ee uu hayo Xafiiska Tacliinta Sare (OHE). Waxa kale oo aad xaq u leedahay inaad hesho nuqullo xogta dadwaynaha u furan. Waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso xogta, lacag la'aan ahaan, ka hor intaadan go'aansan inaad codsato nuqullo. Sharciga Hab-Dhaqanka Xogta ayaa u oggolaanaya OHE inay ugu dallacdo lacag nuqul qaadashada.

**Sida loo Sameeyo Weyddiisiga Xogta**

Madaxa mas'uulka ka ahi waa sarkaalka loogu xilsaaray sharci ahaan inuu yahay shaqsiga mas'uulka ka ah ururinta, isticmaalka, iyo faafinta qaybta dawladeed xogteeda. Marka la joogo hay'adaha gobol, madaxa ka masuulka ahi waa guddoomiyaha. Codsiyada xogta badnaa waxa hawshooda qabta xubnaha shaqaalaha. Si aad u fiiriso xogta ama aad u weyddiisato nuqullada xogta OHE ee ay hayso, ku aaddi weyddiisigaaga U Qaabbilsanaha Hab-dhaqanka Xogta aagga mowduuca aad aamminsantahay xogta adiga ku saabsani inay ku kaysan tahay. Liistada Qaybaha OHE iyo u qaabbilsanaha qaybtaas ayaa ku qoran dhammaadka ujeeddadan. Haddii aadan garanaynin U Qaabbilsanaha arrintaad ku habboon, waxaad weyddiin kartaa OHE adiga oo waca 651-642-0567 am 800-657-3866. Weyddiisyada warbaahinta waxa hawshooda qabta U Qaabbilsanaha waaxda Isgaarsiinta.

**Waa inaad ku sameysaa weyddiisigaaga xogta qoraal ahaan**

Iimaylka ayaa la mid ah weyddiisiga qoraalka ah. Waxaad isticmaali kartaa foomka weyddisiga xogta ee ku lifaaqan dukumentigan, laakiin waajib kuguma aha inaad isticmaasho foomka. Haddaad doorbiddo inaadan isticmaalin foomka weyddiisiga xogta, weyddiisigaaga waa inay ku jirtaa:

- Adiga, oo xubin ka mid ah dadwaynaha, aad weyddiisanayso xogta iyada oo hoos timaad Xeerka Hab-Dhaqanka Xogta (xeer. Minn. §13).
- Sifayn bayaan ah oo ku saabsan xogta aad rabto.
- Haddii aad jeceshahay inaad fiiriso xogta, ama aad ka haysato nuqullo xogta, ama labadaba.

OHE kaagama baahan karto inaad adiga oo ah, xubin dadwayne ka mid ah isku sheegto qofkaad tahay ama aad u sharaxdo sababta weyddiisadka xogtaadu tahay. Hase yeeshe, iyada oo ku xiran sida aad nooga rabto inaan u socodsiino weydiisadkaaga, (tusaale, in aan kuugu soo dirno boostada nuqullada xogta), OHE ayaa laga yaabaa in ay kaaga baahdo qaarkood macluumaadka lagaala soo xiriirayo. Intaa wax u dheer, fadlan maskaxda ku hay in haddii OHE aysan fahmin weyddiisadkaaga oo aysan haysan hab adiga lagugula soo xiriiro, waxa dhici karta inay habsocodsiin karin weyddisadkaaga.

**Sidee ayay OHE uga Jawaabtaa Weyddiisiga Xogta**

Markaad ku sameyso ku weyddiisikaaga, U Qaabbilsanaha ayaa kaagaga soo jawaabi doona labo maalmood shaqo gudahood oo uu kuu wargalin doona in la helay oo la fiirsanayo.  Jawaabtu waxa laguugu soo diri doonaa isla qaabkii wada xiriir ee aad ku soo dirtay weyddiisiga, haddii habab kale oo lagu wada xiriiro aad ku sheegto weyddiisigaaga mooye.  Haddii OHE ay kugu heli weydo habkii kula soo xiriirkaagii aad weyddiisiga ku sameysay, oo aadan bixin macluumaad kale oo lagugula soo xiriiro, OHE ayaa tixgelin doonta in weydiisigaaga xogta faraha laga qaado.  Haddii aadan jawaab ku helin labo maalmood gudahood, kala xiriir Sarkaalka Adeecidda Hab-dhaqannada Xogta 651-642-0567, riix 9 kaddibna 0.

Haddii aysan ku kala caddayn xogta aad weyddiisanayso, OHE ayaa ku weyddiisan doonta inaad sifeyso.  Haddii weyddiisigaagu yahay mid cayiman oo kooban, OHE ayaa si wax ku ool leh u soo heli, u fiirsan, oo kuu tusi xogta, haddii ay jirto.   Weyddiiska lagu rabo xog ballaaran, ama noocyo xog aan kala caddayn ah, ayay badiyaa ka soo baxan xog muggeedu aad u badan tahay, oo qaadatana muddo ka badan in la habsocodsiiyo.

- Haddii OHE aysan haynin xogta, OHE ayaa kugu soo wargalin doonta 10 maalmood gudahood.
- Haddii OHE ay hayso xogta, laakiin xogtu aysan dadwaynaha u furnayn, OHE ayaa kuugu soo wargalin doonta sida ugu dhaqsaha badan ee ugu macquulsan oo kuu sheegi kuwayihiin xeerarka gaark ah ee sheegaya in xogtu aysan ahayn mid dadwaynaha u furan.
- Haddii OHE ay hayso xogta, oo xogtu ay tahay mid dadwayne, OHE way kaga jawaabi doontaa weyddiisiga si habboon oo dhakhso leh, gudahooda wakhti macquul ah.  Iyadoo la raacayo qaybta qiimaha nuqulka, ee hoosta ku taal, OHE ayaa kuu soo diri karta weyddiisi loogu talagalay deebaajiga wadarta qiimaha la qiyaasay ee raadinta iyo soo soorka, iyo walibana qiimayaasha nuqulka.  Haddii aadan kaga soo jawaabin weyddiisiga deebaajiga 10 maalmo shaqo gudahood, OHE ayaa tixgelin doonta in weydiisigaaga xogta faraha laga qaado.  Haddii xogta lagu jawaabayo u muggeedu sarrayso, OHE ayaa laga yaabaa inay shaaca uga qaaddo xogta si muddooyin isku daba xiga ah illaa jawaabta la dhammaystirayo.  OHE ayaa uga jawaabi doonta weyddisadkaaga iyaga oo sameynaya mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:
    - Ka qabso taarikh, wakhti, iyo goob aad ku fiiriso xogta, lacag la'aan, ama
    - Waxa laguu siin doonaa nuqullada xogta sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah.  Waad dooran kartaa inaad soo qaadato nuqulladaada ama OHE ayaa boostada kuugu soo diri doonta nuqullada.  OHE ayaa ku siin doonta nuqlo elektiroonig ah markaad la weyddiisto haddii OHE ay xogta ku hayso qaab elektiroonig ah.  Dhererka wakhtiga ay qaadanayso in lagu hab-socodsiiyo weyddiisadkaaga ayaa ku xiran dhowr doorsoomayaal: mugga xogta in la eego ah, inta nuqul ee la weyddiistay, inta xubnood ee shaqaale ee diyaarka u ah in kuu jawaabaan, iyo inta weyddiisadyo xog ee kale ee la hab-socodsiinayo.  Khidmadaha ayaa lagu sifeynayaa hoosta.

Haddii aadan fahmin qaar ka mid ah macluumaadka (ereyo-bixinno farsamo, soo-gaabinta erayda, ama xarfaha hore ku gaabinta), fadlan u sheeg U-Qaabbilsanaha.  In kasta oo xeerku uusan na faraynin inaan ka jawaabno su'aalaha aan ku saabsanayn weyddiisadka xogtaada ama aan u afcelinno/sharraxno midkoodna ha noqotee xogta dadwayne ee jawaabitaanka ah, OHE ayaa ku ku dadaali doonta inay sidaas samayso.

Xeerka Hab-Dhaqanka Xogta ayaan nooga baahnayn annagu inaan abuurno ama ururinno xog cusub annaga oo u jawaabayna weyddiisi xog.  OHE waajib kuma aha inay ku bixiso xog qaab ama diyaarin gaar ah haddii aan xogta lagu hayn qaabkaas ama diyaarintaas.  Haddii OHE ay oggolaato in la abuuro xog ka jawaabeysa weyddiisigaaga, waxay kaala shaqayn doontaa sifaynta weyddiisigaaga, oo ay ka mid yihiin qiimaha iyo waqtiga jawaab celinta.

Waxaad u samayn kartaa weyddiisiyada muddada dheer qaata ee xogta. Weyddiisyada muddada dheer qaata ayaa ah weyddiisyo loogu talagalay xog oo u baahan kara jawaabcelinno muddo dheer qaata.  Weyddiisyada muddada dheer qaata aya dhaca seddex bilood kaddib, oo wixii khidmado ah ee lagaa rabo waa in loo bixiyaa si buuxda dhammaadka muddada saddexda bilood ah iyo kahor cusboonaysiinta weyddiisiga muddada qaata.

Xogta kooban ayaa ah diiwaanno ama waxrbixinno xogeed la diyaariyey iyadoo laga saaray dhammaan waxyaabaha dadka lagu garan karo xogta asturan ama qarsoodiga ah ee shaqsiyaadka.  OHE ayaa diyaarin doonta soo koobitaanka xogta haddii u weyddiistuhu ku dalbado qoraal oo u horay u bixiyo qiimaha la qiyaasay ee diyaarinta xogta, iyada oo bixinta ugu dambeysa la dhiibo kahor intayna OHE kuu siidayn xogta kooban adiga.  Waxaad isticmaali kartaa foomka weyddisiga xogta ee ku lifaaqan dukumentigan, laakiin waajib kuguma aha inaad isticmaasho foomka.  Waxaan kaga jawaabi doonnaa weyddiisadkaaga 10 maalmo shaqo gudahood iyadoooo wadata faahfaahinta waqtiga ay xogtu diyaar noqon doonto iyo qiimayaasha la qiyaasay.  Haddaad doorbiddo inaadan isticmaalin foomka weyddiisiga xogta, weyddiisigaaga waa inay ku jirtaa:

- Adiga, oo xubin ka mid ah dadwaynaha, aad weyddiisanayso xog kooban iyada oo hoos timaad Xeerka Hab-Dhaqanka Xogta (xeer. Minn. §13).
- Sifayn cad oo ku saabsan xogta kooban ee aad rabto in la diyaariyoo iyo qaabka aad jeclaan lahayd (tusaale ahaan, warqad, elektiroonig, iwm).

**Qiimaha nuqulka loogu talaglay Xubnaha Dadwaynaha**

OHE ayaa ugu dallacda lacag xubnaha dadwaynaha wixii nuqullo ah ee xogta dawladda ah.  Ku dallacan ayaa lagu oggol yahay markay hoos timaad Xeerarka Minnesota, qaybta 13.03, qayb hoosaadka 3 (c).  Waa inaad lacag ka bixisaa nuqullada kahor inta annaan ku siinnin nuqullada adiga.  Kuma dallacanno lacag nuqullada haddii u qiimuhu ka yar yahay $10.00.  Wax lacag ah kama qaadno inaan SOO baarno xogta ama aan kala saarno xogta dadwaynaha u furan iyo kuwa aan u furnayn.

- Nuqullada 100 bog ama in kar oo ah midab madow iyo caddaan, xajmiga xaashida ama sharciyeed warqad ah ayay qiimahoodu yahay 25¢ halka nuqul halka-dhinac ah, ama 50¢ nuqulka labada-dhinacba ah.
- Ku dallaca noocyada nuqullada kale badankood, markuuna laca ku dallaca aan lagu dejin qodob ama xeer, ayaa ha qiimaha dhabta ah ee raadinta iyo soobixinta xogta, iyo samaynta nuqullada ama si elektiroonig ahaan xogta loo dirayo.
    - Markay go'aaminayso qiimaha dhabta ah, OHE ayaa raacisa waqtiga- shaqaalaha kaga baxa inuu sameeyo oo u diro nuqullada, qiimaha waxyaabaha aan ku dul nuqulaynayo xogta (warqad haddii ay ka badan tahay 100 bog, CD, DVD, iwm.), iyo qiimayaasha boosta ku dirista. sida tigidhada boostada (haddii ay jiraan).
    - Haddii weyddisadkaagu u yahay nuqullo xog ah oo aannan annagu nuquli karin, sida sawirrada, waxaan kugu soo dallaci doonaa qiimaha dhabta ah ee nuqullada ay tahay inaan u bixino lacagta iibiyaha dibedda ah.
    - Qiimaha waqtiga shaqaalaha waxa lagu xisaabiyaa iyada oo la adeegsanayo mushaharka saacadlaha ah ee shaqaalaha ugu mushaharka yar inuu dhammaystiro hawsha, oo lagu daro 20% oo dheefaha kaabka ah.
    - Haddii, iyada oo ku salaysan weyddiisadkaaga, ay lagama maarmaan noqoto inuu shaqaale mushahar badan qaata u soo raadiyo oo soo helo xogta, waxaan ku xisaabin doonnaa raadinta iyo soo helitaanka ku dallacyada mushaharka/mushqaayadda sare.

**Macluumaadka kula Xiriirka Xogta Hab-Dhaqanka**

**Ugu soo dir wixii xog weyddiisi ah:**

Boostada:
[Gali cinwaanka xilka u-qaabbilsanaha weyddiisiga xogta, hoosta]
1450 Energy Park Drive, Suite 350
St. Paul, MN 55108-5227

Faakis: 651-642-0675, aad ku hagaajiso U-qabbilsanaha ku habboon, hoosta ee ay ku taal "Data Request – public" bogga jaldiga

**Ugu soo dir iimayl leh oo ay ku taal "Data Request – public" sadarka mawduuca**
datarequest.ohe@state.mn.us

**Madaxa Mas'uulka ah**
Guddoomiye

**Sarkaalka Adeecidda Hab-dhaqannada Xogta**
Kuxigeenka Guddoomiyaha

**Wakiillada Hab-Dhaqannada Xogta**

- Maareeyaha Isgaarsiinta
- Maareeyaha Kaalmo Lacageed – Deeqaha
- Maareeyaha Kaalmo Lacageed – Amaaho
- Maareeyaha Cilmi Baarista iyo Ujeeddooyinka
- Maareeyaha Diiwaangelinta Hay'adaha Gaarka ah iyo Liisan Siinta
- Maareeyaha Hanti-dhowrka
- Maareeyaha Shaqada iyo Shaqaalaha
- Maareeyaha Deeqaha Tartanka Leh, Deeqaha Sharci Ahaan Loogu Magacaabay, iyo Xiriirrada Dawladda
- Maareeyaha Get Ready! (Diyaar Garowga!)
- Maareeyaha Xisaabinta

**Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota**

**Foomka Codsiga Weyddiisadka Xogta Dadwaynaha u Furan**

| | | |
|---|---|---|
| **Magaca:** | **Taariikhda:** | |
| **Cinwaanka:** | | |
| **Magaalo:** | **Gobol:** | **Sib koodh:** |
| **Telefoon Lambar:** | **Iimayl:** | |
| **U Qaabbilsane:** | | |

Fiiro gaar ah: Waajib kuguma aha inaad bixiso macluumaadka kor ku yaal. Hase ahaate, OHE ayaa laga yaabaa inaysan awoodin inay ku siiso jawaabta xogta dadwaynaha u furan midkoodna haddii ayna jirin macluumaad lagugula soo xiriio.

Fadlan ku sifee xogta aad weyddiisanayso sanduuqa hoosta ku yaal ee aad rabto inay OHE ku siiso:

_________ Baaritaan ___________Nuqullo _____________Baaritaan iyo Nuqullo labadaba

| |
|---|
| |

MS § 13.03, qodob-hoosaad. 3, ayaa awood u siinaysa OHE inay ku soo dalacaan khidmado si ay u soo ceshadaan kharashaadka ay galeen si ay u bixiyaan nuqulada xogta. Lacag sii-bixin ayaa loo baahan yahay kahor helitaanka nuqullada xogta.